


# Qorshaha Akhriska Guriga ee loogu talagalay Ardayga

## Dugsiga Xanaanada – fasalka 3aad



Sida waafaqsan oggolaanshaha laga helo Waaxda Waxbarashada Mississippi

Daryeel bixiyaasha Qaaliga ahaaw,

Waaxda waxbarashada ee Nebraska waxay aqoonsanaysaa doorka waalidka, masuuliyiinta, iyo daryeel bixiyaasha kale iyo xubnaha qoyska marka ay imaato saameynta togan ee guusha caruurta ee dugsiga. Inaad caruurta wax la akhrido xiliga ka baxsan dugsiga ayaa ah habka ugu wanaagsan ee looga caawin karo inay mar horeba ku guuleystaan akhriska. Inaad caruurta ka caawiso inay wax akhriyaan marka ay dhiganayaan fasalada 3aad ayaa ah shaqo wanaagsan. Inaad ilmahaaga 20 daqiiqo maalinkii wax la akhriso iyo inaad sameysid waxyaabo yaryar oo qayb ka ah hawl maalmeedkaaga, ayaa ka caawin karta inay kobciyaan heerka akhriskooda, qorista, waxbarashada, xirfada ku hadalka luuqada Ingiriisiga iyo luuqadooda hooyo.

Macluumaadkaan waxaa loogu talagalay inuu kaa caawiyo fahanka sida ilmahaaga looga taageero kobcinta iyo hormarinta akhriska. Isticmaalida agabyada laga helo gurigaaga, waxaad awoodi doontaa inaad ku celceliso xirfadaha lagama maarmaanka ah si aad ilmahaaga oga caawiso siduu u noqon lahaa ilmo xirfad leh.

Waxaan ku faraxsanahay inaan ku siino Qorshahaan Akhriska Guriga. Fadlan booqo education.ne.gov/nebraskareads si aad u hesho macluumaad dheeraad ah!

Kii daacada ah,
*Xafiiska Waxbaridda, Barashada, iyo Qiimeynta*
*Xafiiska Akhris-qoraalka*
*Waaxda Waxbarashada ee Nebraska*

***Wacyigelinta Codka*** ayaa ah awooda lagu aqoonsado kuna shaqeeya codadka luuqada lagu hadlo. Waa aasaaska waxbarashada akhriska. Ardayda hela wacyigelinta codka ayaa awooda inay:

- erayga laxameeyaan;
- tiriyaan xarfadaha;
- aqoonsadaan codka kaliya iyo eraya;
- ku daraan, ka saaraan, iyo inay erayga badelaan erayada;
- kala jaraan erayada leh codadka kala duduwan dib isku dhejiyaan.

- La ciyaar ilmahaaga ciyaar taas oo midkiiba uu helaayo erayo leh laxan, kay doonaan ha ahaadeene Ingiriisi ama luuqada looga hadlo guriga.

- Isticmaal joornaalka, wargeyska, iyo xayeysiinada dukaanka si ilmahaaga shayga oga fiiriyo erayga laxanka leh uuna oga soo saaro. Asaga/ayada waxay ku sawiri kartaa sawirada warqad si ay u abuuraan laxanka kuleejka.

- Sii ilmahaaga liis ay ku qoran yihiin saddex eray oo labo kamid ah ay leeyihiin laxan. Waydii inuu aqoonsado erayga meesha faqadka ku ah.

- Ku dheh ilmahaaga eray fudud adoo ku hadlaaya Ingiriisi ama luuqada uu ku dhashay sida, "***Nawad aan baanka ku ciyaarneee***." Waydii ilmahaaga inuu kuu sheego inta eray ee ku jirta jumlada. Ilmahaaga ha sacbiyo marka uu maqlo eray kasta oo kujira jumlada.

- Ku celceli erayada leh codka dheer oo isku midka ah. Tusaale, ilmahaaga ku xujeeso inuu ka fakaro inta eray oo ka biloowda xarafka "t" sida erayada ***tree***, ***table***, ***toe***, ***tuba***, **tomorrow**, **train**, **top**, **truck**.

- Tus ilmahaaga sawirada xubnaha qoyska iyo saaxiibada. Waydii ilmahaaga inuu sheego qofka magaciisa, kadibna tiri tirada xarfaha kujira magac kasta.

- Sii ilmahaaga liiska saddex eray waydiina inuu sheego/sheego kuwa iska dhawaaqa ka bilaabanaya, tusaale, "***Erayada ka bilaabanaya isku dhawaaqa: paper, pickle, ama dish?"***

***Dhawaaqa*** waa awooda lagu fahmo xariirka ka dhexeeya xarfaha iyo cododkooda. Tani waxaa kamid ah:

- garashada qaababka dabcan ee u taagan dhawaaqa;
- hababka xarfaha; iyo
- qaybha erayada sida (kuwa ereyga hore ka qabsada, kuwa gadaal ka qabsada, iyo erayada hoose).

- Ku qar xarfaha waraaq isku dhegan kuna fidi guud ahaan miiska korkiisa. Ku dhawaaq xarafka waydiina ilmahaaga inuu sheego xarafka codkaas leh.

- Geli xarfo leh magneetic talaagada. Ku dhawaaq xarafka magacooda ama dhawaaqa xarafka kadibna waydii ilmahaaga inuu malgacad kusoo qabto xarafka.

- Kareemka xiirashada oo xoogaa ah mari miiska ama koontarka kore. Ku dhawaaq xarafka magacooda ama dhawaaqa xarafka kadibna waydii ilmahaaga xarafka ku qoro kareemka xiirashada.

- Sii ilmaaga ha isticmaalee wargeysyada, joornaalka, ama buugaagta si uu oga fiiriyo erayada isku xarfaha ka kaca. Tusaale, miis/tufaax (2 xaraf) ama moos/maroodi (3 xaraf).

***Faseexnimada*** waa awooda lagu akhrin karo waxna lagu fahmi karo ayadoo la boobsiinaayo. Tani waxaa kamid ah:

- in erayga si ootamaatik ah loo aqoonsado;
- in erayga si sax ah loo aqoonsado; iyo
- in la isticmaalo oraah (oo badaleysa codka ayadoo lagu saleenaayo wax dhacay).

Dadka sida faseexa ah wax u akhriya waxay awoodaan inay xasuustaan ayna fahmaan waxa ay akhriyeen. Xirfadaan waxa uu isku xirayaa fahanka iyo aqoonsiga erayga. Marka ardaydu ay si faseex ah wax u akhrin karaan, waxay taas ka caawinaysaa in maskaxdu fahanto fariinta.

- La akhri ilmaaha Ingiriisiga iyo luuqadiisa hooyo! Marka aad ilmahaaga si kor ah wax ula akhriso, waxaad siinaysaa hab u fududeenaya akhriska faseexa ah.

- Raadi cod duuban si aad u siiso ilmahaaga. Webseetyada oonleenka ah sida kuwa Taariikhda Oonleenka (https://www.storylineonline.net) si ilmahaagu u haysto taariikh bilaash ah oo uu dhageysto.

- Kula celceli ilmahaaga codka dhawaaqa. Akhri qayb yar oo ka tirsan sheekada kadibna ilmahaaga u ogoloow inuu akhriyo wixii aad akhrisay. Isticmaal fartaada si aad ugu haysto meesha aad akhrinayso.

- Dib u akhri isla sheekada dhoor jeer. Ku celcelinta sheekada, luuqaday ahaataba, waxay ilmahaaga ka caawinaysaa inay fahmaan erayada iyo codka.

- Markaad ilmahaaga la akhriso, dhageyso meesha uu hadba gefgefaayo. Waxaa jira tago marka la eego muusikada kuna aadan akhriska.

***Erayga cusub*** waxay kor u qaadaan maskaxda ilmaha iyo micnaha erayga.
Tani waxaa kamid ah:

- *Erayada maqalka* (erayada ay ardaydu fahmayaan marka ay akhriyaan iyo marka lagu hadlo); iyo
- *Erayada micnaha guud leh* (erayada ardayda sida fiican u yaqaananaan si ay u isticmaalaan marka ay hadlayaan waxna qorayaan).

Haysashada erey qaabilaad oo weyn oo micna leh ayaa ardayda ku caawisa fahamka akhriska. Erayo cusub oo badan ayaa kobcinaaya heerka xariirka - dhageysiga, hadalka, akhriska, iyo wax qorida.

- Si kor ah ula akhri ilmahaaga! Dooro buug ilmaha ku adkaan doonta inuu akhriyo/akhriso. Waxay maqlayaan ayna baranayaan erayo cusub iyo sida loo isticmaalo.

- La daawo ilmaha filimka aad jeceshahay iyo madadaalada talefeshinka. Awooda saar erayada waawayn.

- Isticmaal sawir aad kasoo saartay wargeyska, joornaalka, ama buuga si aad kaga hadasho micnaha erayga. Isticmaal midkood Ingiriisi ama luuqada hooyo.

- Magacoow eray. Qaado markaaga si aad ugu dhawaaqdo eray kale oo ay isku micno yihiin.

***Fahanka*** waa awooda fahanka micnaha jumlada.

Fahanku waa muhiimada ugu wayn marka ay imaato akhriska. Ardayda sida fudud u fahma waxa ay akhrinayaan ayay u badan tahay inay ku raaxaystaan waxa ay akhrinayaan. Waxaa jira faa'iidooyin badan oo uu leeyahay akhrisku, kaas oo ilmaha ka caawiya tacliin ahaan iyo nolashooda danbe.

- Qaad "sawirka socodka ah" adoo isticmaalaya Ingiriisi ama luuqada hooyo. U ogoloow ilmahaaga inuu fiiriyo sawirka kadibna qiyaas waxa ku dhacaya sheekada.

- Haddii aad akhrinayso buug malaawaal ah, kala hadal ilmahaaga waxa ay horey u bartay kuna saabsan mawduucaa.

- Marka aad akhrinayso, ku jooji bog kasta si aad u fiirisid in ilmahaagu fahmay waxa sheekadu ka sheekeynayso.

- Ku dhiirigeli ilmahaaga inuu qiimeeyo xarfaha, ujeedada, ama sababta ay sheekada ugu jiraan.

- Kadib marka aad akhriso, waydii ilmahaaga inuu kuu sheego waxa uu akhriyay. Waydii ilmahaaga inuu qeexo macluumaadka erayga muhiimka ah, ujeedada loo isticmaalay, iyo meesha uu ka dhacay.

- Waydii ilmahaagu inuu fahmay/fahantay waxa sheekadu ku saabsan tahay.

**Tilmaamaha Akhriska ee ka caawinaaya ilmahaaga inuu ku guuleysto**

- ☐ Akhriska ka dhig hawl maalin kasta la qabto, xataa ha ahaatee dhoor daqiiqo. Raadi qayb ka mid ah maalintaada si aad waqti ugu hesho akhriska, iyo meelaha aad ku keydin karto buugaagta, maadaama ay mar kasta diyaar yihiin.
- ☐ Kala hadal sawirada kujira buugaagta. Ma ahan inaad akhrido buuga si aad sheeko oga sheekayso.
- ☐ U ogoloow ilmahaagu inuu rogo bogga marka aad wax wada akhrinaysaan.
- ☐ Tus ilmahaaga bogga kore una sharax waxa sheekadu ku saabsan tahay.
- ☐ Farta ku haay erayada aad akhrinayso.
- ☐ Sheekada ku akhri cocod kale duduwan xaraf kasta. Samee madadaalo!
- ☐ Dooro buugaag ku saabsan dhacdooyinka nolosha ilmahaaga, sida bilaabida dugsiga, u tagista dhakhtarka ilkaha, ama daryeelka xayawaannada guryaha.
- ☐ Wax ka waydii sheekadu waxa ay ku aabsan tahay. Maxaad u malaynaysaa inay dhici doonaan? Waa maxay waxaan? Magac u taganahaan waxaad ka aamin santahay?
- ☐ Wax ka waydii sheekadu waxa ay ku saabsan tahay. Kala hadal hawlaha qoyska iyo waxyaabaha kale.
- ☐ Waydii ilmahaaga inuu kaaga sheekeeyo sheekada.
- ☐ Booqo maktabadaada maxaliga ah marar badan!

**Waaxda Waxbarashada ee Nebraska**
301 Centennial Mall South
P.O. Box 94987
Lincoln, NE 68509-4987
402.471.2295

**Xaafiska Waxbarida, Waxbarashada, iyo Qiimeynta**

**Allyson DenBeste**, Tacliinta Xaafiiska, allyson.denbeste@nebraska.gov

**Olivia Alberts**, Akhriska, olivia.alberts@nebraska.gov

**Becky Michael**, Farshaxanka Luuqada Ingiriisiga, becky.michael@nebraska.gov